



Tallaalka iyo autiisamka: Daahfurka khuraafaadka



Waxaan jeclaan lahaa inaan wax ka ogaado autismka. Tallaaladu ma badbaado u yihiin ilmahayga?



Tallaaladu ma keenaan autism

Daraasado badan oo adduunko dhan ah, oo lagu sameeyey boqollaal kun oo carruur ah, ayaa dhammaantood isku raacay: tallaaladu ma keenaan autism.



Laakiin miyaanay jirin daraasad muujinaysa xidhiidhka ka dhexeeya tallaalada iyo autismka?



Khuraafaadku waxa uu ka yimid been laga soo xigtay daraasad aan la aqoonsanayn.

Sannadkii 1998-kii, nin la odhan jiray Andrew Wakefield ayaa daabacay waraaq uu ku sheegayo inuu jiro xidhiidhka ka dhexeeya tallaalka MMR (jadeecada, qaamo-qashiirta, jadeecada Jarmalka (rubella)) iyo autismka. Saynis-yahanadu aad bay uga walaacsanaayeen waxayna sameeyeen daraasado badan si ay isugu dayaan in ay helaan xidhiidhka. Kadib khabaradu waxay ogaadeen in Wakefield uu xog been abuur ah u sameeyay warqaddan. Waa maxay sababtu? Wuxuu damcay inuu dadka marin habaabiyo si uu lacag uga sameeyo iibinta tallaalka la mid ah.

Wakefield waxa uu lumiyay shatigii uu kaga shaqaysan jiray daawaynta dalkiisa hooyo, Joornaalkii soo daabacayna ee UK warqadii ayuu la noqday. Tan iyo markaas, qofna, xitaa Wakefield, ma uusan awoodin inuu muujiyo xiriir kasta oo ka dhexeeya tallaalada iyo autismka.





Tallaalka iyo autiisamka: Daahfurka khuraafaadka



Waa maxay sababta aanan u aamini karin daraasadda Wakefield?

Daraasaddu waxay ahayd mid ka baxsan anshaxa sababa badan awgood

Wakefield wuxuu rabay inuu lacag sameeyo. Xataa ka hor Daraasaddiisa, Wakefield waxaa kharash siiyey qareeno doonayay inay shaki ka abuuraan tallaalka MMR. Dhab ahaantii, Wakefield wuxuu isku dayayey inuu soo saaro tallaalka jadeecada, mana uusan dooneynin cid la tartanta.



Daraasadu aad bay u yarayd. Daraasada waxaa lagu sameeyey 12 caruur ah. Tani aad bay uga yar tahay in ay matasho dadweynaha guud.

Wakefield waxa uu sameeyay xog ku saabsan ka qaybgalayaasha daraasadda. Wakefield wuxuu soo jeediyay in tallaalka MMR uu sababay in carruurta daraasaddiisa ku jirta ay yeeshaan cudurka autismka. Dhab ahaantii, qaar ka mid ah carruurta ayaa lahaa arrimo koriinka ah, sida autismka, ka hor inta aan la tallaalin. Carruurta qaar ka mid ah waligood lagama helin cudurka autism.



Markaa maxaa keena autismka?

Autisamku ma laha hal sabab.

Tallaaladu ma keenaan autism. Waxaan ognahay in autismka ay saamayn ku yeelan karaan waxyaabo badan, oo ay ku jiraan hido sidaha iyo deegaanka ilmaha. Taageerada iyo jacaylka waalidka iyo bixiyeyaasha daryeelka carruurta, ilmaha qaba autismka waxay ku noolaan karaan nolol farxad leh oo waxtar leh. Tallaalku waa mid ka mid ah tallaabooyinka ugu haboon, ugu waxtarka badan ee aad qaadi karto si aad u ilaaliso caafimaadka ilmahaaga, hadda iyo mustaqbalka.

